Xaafada City Heights ka dhisida Bulsho Caafimaad qabta:
Talo-soo jeedinta Nidaamka Qorshaha 9-bilood

Shirarkii kala dhacay bilihii Maajo 18 keeda iyo Juunyo 1 deeda, Guddiga Qorsheynta oo ay taageertay Mid-City CAN si talo-soo jeedintan loo sameeyo, waxaa bishii Juunyo 2 deedii ansaxiyey Golaha Isku-dubaridka ee Mid-City CAN.

<u>Fikradaha Tilmaanta ah ee Nidaamka Qorshaha loogu talagalay</u>

Xubnaha Guddiga Kormeerka ayaa soo jeediyey fikradaha soo socda oo hageya nidaamka qorshaha:

1. <u>In lagu wado daro</u>: Dhammaan kooxaha dadka degan ahi waxay awood u leeyihiin inay nidaamka qorsheynta ka qeyb galaan. In fikradaas loo hoggaansamo macnaheedu waxaa weeyaan in dadka sida buuxda uga soo qeyb galeya la siiyo taageero, tababar, tarjumis, ilmo-hayn iyo kaalmada farsamo ee ay u baahan yihiin.

2. <u>Deegaanka la xidhiidha</u>: Waxaa la fahansan yahay in dadka ku nool xaafada City Heights ay helayaan faa'iidada ugu weyn ee mashuurcan ka soo baxda. Nidaamkaas waa inuu ku jiraa in dadka xaafada deggan la siiyo fursadaha dhabta ah si ay uga qeyb galaan qorshaha la dejineyo. Saddex Guddi ee bulshada waa inay qorshaha ku darsadaan inay dhageystaan aragtiyada iyo ra'yiga bulshada, si dadkaasu ay nidaamkaas la sameyno uga qeyb qaataan. Mar kale si hawlgalka bulshadu uu noqdo mid faa'iido leh, waa in ay jirtaa ha'ayad jaaliyada ka kaalmeyneysa in dadka deegaanku ay is habbeeyaan, ay badhitaan ku sameeyaan warbixinada nidaamka laga dhex abuurey iyo inay dareenkooda si cad u gudbiyaan. Waxaa kale oo muhim ah oo in la xusuusnaado mudan in intii nidaamkan qorsheynta la wadey oo dhan intii hanti laga adeegsan lahaa la adeegsadey qorshe ku dhisan xallinta dhbaatooyinka, taas oo laga bilaabey waxyaabaha ay bulshada ku ku wanaagsan tahay, si hawshan bilowgeeda ay uga qeyb qaadato.

3. <u>Caddeynmaha ku salleysan</u>: Ururka la yidhaahdo The California Endowment ayaa xaqiiqsadey natiijooyikii ka soo baxay, *siyaabaha* natiijooyinkaas lagu gaadheyna inta badan bulshada ayey ka timid. Nidaamkaas caddeymaha ku salleysan macnaheedu waxaa weeyaan in nidaamka ay ku jireen waxay ahayd in macluumaadka aasaasiga ah ee loo baahan yahay fahanka xaalada hada lagu jiro iyo isbeddelkaas oo la xidhiidha natiijooyinka tobanka ah ee la gaadhay. Macluumaadka la soo uruuriyey waxaa ku jira ama ka mid ah aragtida aqooneed ee bulshada oo la helay. Macluumaadkaas soo uruurinteeda waxaa la isticmaaley shirarka guriga lagu qabto, ahmiyada arrin gaar ah siiya**,** wareysiyo, baadhitaano, iwm, oo la sameeyey. Saddexda bilood ee ugu horreysa nidaamka qorsheynta waxay ahayd uruurinta macluumaadkan iyo balaadhinta bulshada ama hawlgalka dadka deegaanka deggan.

4. <u>Waxaad ku dartaa waxyaabaha wax lagu barto</u>: Maadaama mashruucanu uu bulshada iyo ururka The California Endowment uu u hagayo meel aan la garaneynin, nidaamkanu waa inuu ku dhisnaadaa ra'yiga dadweynaha laga helo iyo qiimeynta ay isku sameeyaan, si mashruucu uu u

noqdo mid awoodi kara inuu isagu isa saxo, markii loo baahdo. U hoggaansanaanta fikradanu waxay u baahan tahay in nidaamkan wakhti la siiyo. Ururka bulshada ayaa adeeggan ka shaqadiisa qabaneya. Kooxaha wax ku dhaqaajiya (Momentum Teams) waxaa lagu xoojin karaa iyada oo qiimeyn isku sameeya, marka ay munaasabad soo bandhigeyaa, isla mar ahaantaasna, jaaliyada guud ahaan waxaa la siineyaa wakhti ay ku qiimeeyaan jihada uu mashruucu u socdo.

5. Noqda kuwa dabcsan oo si wadajir ah u wada shaqeeya: Dimoqiraadiyada iyo hawlgalka bulshada toona maaha kuwo nadiif ama sax ah. Haddii nidaamku uu ku guuleysto labadan fikradood ee soo socda (ku wada jira iyo deegaanka la xidhidha), kedib waxaa hubaal ah in sagaalka bilood ee soo socda dadka ka qeyb galeya in ay tiradoodu kordheyso. Marka dadka ka qeyb galeya ay sii kordhaanba waxaa loo baahan yahay in qorshaha wax laga beddelo, sababto ah waa in wax lagaga daraa ra'yiga dadkan cusub ay ku soo biiriyeen. Awooda dabacsanaantu waxay ku xidhan tahay hadba si waxyaabaha la barety loogu dabaqo, fikiradan kor ku xusan, ee nidaamka qorshaha la xidhiidha.

6. Waxaad noqotaa qof muhandis ah oo ku calool adag ama ku dhiirran khatarta u badheedha, marka uu wajahayo Isbeddelka Bulsho: Ugu dambeystii, bilowganu wuxuu baadigoob ugu jiraa sidii uu nidaamyada deegaaneed iyo kuwa dawlad-goboleedka uu dhammaan dadka ku nool Kaalifoorrniya tayada noloshooda kor ugu qaadi lahaa. Taas waxaa ku jira noocyo badan oo wax loo wajahayo si loo sameeyo isbeddel macne leh oo yool dheer leh, si yoolalka la damacsan yahay loo gaadho. Nidaamkaasu waa inuu ka soo dhex baxaa hawlaha hada sida wadajirka ah loo qabaneyo, waana inuu kor u qaadaa in tartan waxqabad lagu galo mar kastaoo ay macquul noqoto. Tijaabooyinka lagu sameynayo adeegyada hada jira, mashaariicda tijaabooyinka ah ee xal loogu raadineyo dhibaatooyinkii ama mushkiladihii hore, iyo in si dhab ah dadka deegaanka looga qeyb geliyo hawlaha waxay u baahan tahay in si wadajir ah wax loo hindiso iyo in khaladaadkii horey loo sameeyey iyada oo iskuday la sameynayo wax looga barto. Waxaan haysanaa fursad gaar ah. Sidaas darted, waa inaynaan ku tiirsanaanin dareenkeenii macquulka ah ee aan wakhtiyadii la soo dhaafay ka helay, laakiin waa inaan isku daynaa waxyaabaha aan macquulka ahayn iyo cakiran ama guracan. Haddii aynaan inagu hada sameynin, yaa sameyn doona, goormayse la sameyn doonaan?

7. Waxaad Abuurtaa Bulsho Caafimaad qabta: Haddii iskudaygan lagu guuleysto, waxay xaafada City heights muddo toban sanno ah gudahood ku noqoneysaa meel hada sida ay tahay aad uga duwan. Marka qorshaha loo sameynayo isbbedlka la rabo, waa in laga taxadaraa sida loo sii wadi karaa isbeddelkaas muddo tobanka sanno ee so socda iyo wixii ka dambeeya. Fikradaasu waxay si toos ah ula xidhiidhaa fikradaha ah sameynta nidaamka ku wada jira iyo deegaanka la xidhiidha. Sii waditaanka hawl la sii wado waxay macquul noqon kartaa oo keliya marka ugu dambeystii ay jaaliyada dadka deegaankaasu ay mulki ahaan u leeyihiin. Maadaama abaabulka bulshada ay tahay hawl badan oo iska socota, waa in qorshaha lagu darsadaa siyaabo kale oo bulshada lagu caawinyo, si loo sameeyo hoggaaminta iyo isku dubaridaka jaaliyada, taas oo keenaysan in codka nolosha dadka deegaanka City Heights deggan si joogta loo maqlo.

Yaa ka qeyb galeya nidaamka qorshahan?



Waxaa cad in ra'yiga la isku raacay uu yahay in dhammaan dadka deggan ah xaafada City Heights ay ka qeyb qaataan nidaamka qorshaha ee la sameynayo, laakiin weli lama hayo macno caam ah oo la isku raacsan yahay oo kooxda deggan. Hal arrin oo loo maleyn karo kooxaha deegaanku waxaa weeyaan sida ay dadkaasu bulshada ugu xidhan yihiin. Jaantuska ku yaal midigtan wuxuu tusineyaa shan kooxood: Dadka meel deggan, Ha'ayadaha Adeegyada bixiya, Ha'yadaha Dawlada, Kooxaha Dadweynaha, iyo Ganacsiyada. Marka ay goobooyinka jaantusku ay is dhex galaan, waxay muujineysaa in uusan jirin qeyb gaar ah aysan dadka intooda badani ka mid noqoneynin ee hal koox ka badan noqoneyaan. Qofka ha'ayada ka shaqeeya oo isla mar ahaantaasna ku nool xaafada City Heights wuxuu galeyaa labada qeybood ee ah adeeg-bixiye iyo inuu kooxada deegaanka deggan ka mid yahay.

Dadku koofiyada dhawr ah ayey xidhan karaan ama ay xidhaanba. Hase ahaatee, waxaa muhim ah in la ogano in koox kasta oo dadkaas ka mid ahi ay danahooda leeyihiin. Laakiin in kastoo ay danahaasu mararka qaarkood isku xidhmaan, hadana wakhtiyada qaarkood wey is khilaafi karaan. Dhismaha jaaliyada waa in ra'yiga la soo jeediyey ay u baahan tahay in khilaafkooda la soo bandhigo, kedibna in qorshaha kama-dambeysta ah lagu xaliyo. Taas macnaheedu waxaa weeyaan in nidaamka qorshaha ee miiska saran tixgelin la siiyo, isla mar ahaantaasna, u shaqeeyo sidii loo hubsan lahaa in koox kasta ay kursi leedahay.

Marka qorshaha la sameynayo waa tixgelin la siiyaa awooda ay koox kasta leedahay, isla mar ahaantaasna, miiska lagu doodeyo la soo fadhiisiyaa. Dhammaan dadka ka qeyb galeyaasha ah oo dhan waa loo fidiyaa tbabarada iyo kaalmada farsamo ee ay u baahan yihiin si ay diyaar u noqdaan, hawshoodan ay u gutaan. Maadaama dadka qaarkood ay siyaabo kala duwan ugu xidhan yihiin xaafada City Heights ee aan ka ahayn deganaansho, wey adag tahay in lagu qeexo "deganaan." Ugu yaraan waxaa jira afar siyaabood oo loogu xidhnaan karo xaafada City Heights: (1) xaafada City Heights inaad ku nooshahay, (2) Xaafada city Heights inaad hanti ama ganacsi ku leedahay, (3) xaafada Cith heights ay jaaliyadaadu deggan tahay, ama iyo (4) xaafada City heights aad ka shaqeysid.

Qaab-dhismeedka Qorshaha la soo Jeediyey

Kooxaha Mashruuca dhaqaajiya ee Nidaamka qorshaha la soo jeediyey wuxuu ku dadaali doonaa sidii *dhammaan* kooxaha ay ka kooban tahay ay uga soo qeyb geli lahaayeen (dadka deegaanka, ha'yadaha, dawlada, ururada bulshada, iyo ganacsatada) , waxaana lagu kala habbeeyey Afarta Natiijo ee Waaweyn ee iskudaygaas ka soo baxay, taas oo ay sameeyeen shaqaalaha TCE, waxayna u sameeyeen sidatan soo socota:

- “In rabshadaha Dhallinyarada la yareeyo” waxaana soo bandhigi doona ururka la yidhaahdo Kooxaha Dhaqaajiya Mashruuca ee Horuminta Nabadgelyada Bulshada
- “In la Kordhiyo imaanshaha Dugsiga” waxaana soo bandhigi doona Kooxaha Dhaqaajiya Mashruuca ee Imaanshaha Dugsiga
- “In la Beddelo cudurka buurid aan caadiga ahayn ee saf marka ah” waxaana soo bandhigi doona ururka la yidhaahdo Kooxaha Dhaqaajiya Mashruuca ee Cuntada
- “Dhammaan Carruurta in la dejiyo Guri Saxo wanaagsan leh” waxaana soo bandhigi doona ururka la yidhaahdo Kooxaha Dhaqaajiya Mashruuca ee Helitaanka Caafimaadka

Kooxaha Dhaqaajiya Mashruuca waa magaca Xidhiidhada Bulshada u Dooda ama hadasha Mid-City, taas oo si wadajir ah ula shaqeysa xubno ka mid ah jaaliyada iyo kuwa kale ee kuwaas oo ku dadaala sidii wax wanaagsan ay u qabsoomi lahaayeen, waxayna noqon doontaa:

- Mid-City CAN ayaa shaqaaleysay (qalabka shirarka, ilmo-haynta, turjumista afka iyo qoraalka ah, qoddobada shirka, iyo xusuus-qorasho)
- Inay si wadajir ah u wada hoggaamiyaan xubnaha jaaliyada iyo saamileyaasha kale; koox kasta waxay masuul ka noqon doontaa inay hoggaaminteeda sameysato
- Masuul si ay u sameysato wakhtigeeda iyo qorshaheeda shaqo; inay ogaato oo la xidhiidho kuwa aan weli miiska lagu doodeyo soo fadhiisan, laakiin ay ahayd in la soo fadhiisiyo iyo in la ogaado in xubnuhu ay helaan tababarada iyo hoggaaminta looga baahan yahay inay sameeyaan, si loo hubsado in si siman u helaan ama saameyn ku yeeshaan qorshaha dhammaan ka qeybgaleyaasha
- Waa inay oggolaadaan wakhtiyo, qaababka, iyo dariiqadaha lagu helayo ra’yiga dadka kale iyo doodaha (sida in shirar caadi ah maalinimada la qabto, in la yareeyo kullamada dhaca maalmaha Sabtiyada iyo Axadaha ama fiidnimada maalmaha la shaqeeyo, shirarka mid midka ah oo ay saamileyaasha iyo xubnaha jaaliyadu muhim ka yihiin, adeegsiga farsamada casriga ah, iwm)
- In la rajeeyo in wakiilo loo diro si ay bil kasta warbixinada u siiyaan Golaha Baahinta (Networking Council) si loola socodsiiyo kuwa kale ee ka qeybgaleya si a isugu dayaan shaqada kooxdooda; iyo inay warbixin ku soo celiyaan kooxdooda oo ku saabsan kooxaha kale waxyaabaha ay soo jeediyeen

Kooxaha Mashruuca Dhaqaajiya waxay fileyaan laga bilaabo bilowga ka qeyb galeyaasha cusub inay shirarka iyo qorsheynta dhacdooyinka *ilaa iyo* 9-bilood ee nidaamka qorshaha. Run ahaantii, ujeeddada koowaad ee wacyigelinta bulshada iyo Golaha Bulshada inay ku martiqaadaan dad deegaanka iyo saamileyaasha inay ka qeyb galaan Kooxaha Mashruuca Dhaqaajiya. Tanu waxay ku adkaaneysaa dulqaadka ee kooxaha kuwa wada shaqeeyaee bilowga nidaamka, laakiin waxaa muhim ah in lagu daro codadka cusub si qorshan loogu daro sida macquulka ah.

Sida ugu habboon ama ugu fiican waxay tahay in Momentum Teams ay noqon doonaan furaha ugu faa’iido badan ee wadajirka shaqada tobanka sanno ee isku daygaasu uu socda iyo inay u habboon ugu adeegto shaqaalaha TCE inay ku xidhnaan karto marba haddii deeqdaas la bixiyo ay ku caawiso ururks inay fuliso qorshaheeda la sameeyyey 9 kii bilood ee nidaamka qorsheynta.

Wacyigelinta Bulshada**.** In la fahmo in koox kasta ay leedahay dhaqamo u gaar ah oo ay wax ku kala doortaan iyo si gooni u ah oo ay go’aamada u gaadhaan. Waayo si siman warbixinada uma heli karaan ama saameyn kuma yeelan doonaan nidaamka qorshaha ee ku salleysan Kooxaha Mashruuca Dhaqaajiya ay

soo dejisay, taas oo ku salleysan dhaqamada kooxda qorshaha sameysay iyo xirfadaha ay leeyihiin. Xubnaha Guddiga Kormeerka waxay aamisan yihiin qiimaha ay leedahay "shirarka guryaha" (koox yar oo shir ku qabsata guryaha khaaska ah ee la deggan yahay, dugsiyada, beeraha nasashada, meelaha wax la cabbuudo, iwm taas oo ujeeddada laga leeyahay ay tahay in la wacyi geliyo koox gaar ah), taas oo looga dan leeyahay in la abuuro deegaano nabadgelyo iyo badbaado leh si isku daygaas loo gaadhsiiyo xubnaha jaaliyada iyo in Kooxaha Mashruuca Dhaqaajiya lagu soo biiriyo. Shirarka guryaha lagu qabto waxay sameyn doonaan:

- Isku habbeynta ay sameynayaan ururo bulshada oo ku dhisan iyada oo adeegsaneya xubnahooda jaaliyada ee jira, si ay u balaadhiyaan saldhigooda, una xoojiyaan awooda hoggaamineed ee ka qeyb galeyaasha
- In lacag la siiyo dadka marti geliyey shirka guriga lagu qabtey
- Ay yeeshaan ajende isku mid ah iyo jaaliyada kala duwan ee la wacyi gelineyo oo yeesha ujeeddooyin isku mid ah
- In la tilmaansado dhammaan jaaliyadaha xaafada City Heights ee leh dhaqamo iyo asal ka duwan, dhallinyarada, iyo dadka waayeelka ah

Ururada jaaliyadaha ku dhisan ee ka qeyb galeyaasha ah waa inay shirarkaas guryaha lagu qabaneyo masuul ka ahaadaan, warqada qaan-sheegadka bil kasta u soo gudbiyaan, Mid-City CAN lacagta dadka shirarka marti geliyey ee shir kasta si loogu taagerro ururrada ka shaqeeya ee shirarka guriga martigeliya. Lacagta koontada laga saarey waxay yeelan doontaa xadka ururka ka horeeya, wakhtiga dhammaan shirarka guriga lagu qabaneya la fileyo inay dhacaan, iyo tirada shakhsiyaadka ee loo qoondeeyey in lala kulmo ee mid kasta kooxda dhaqaalha jinsiyada, dhallinyarada iyo dadka waayeelka ah. Ururada xiiseeynaya inay ka soo qeyb galaan waxay buuxin doonaan Codsiga Xaq-u-lahaanshaha (qualifications), si loo hubsado inay buuxiyaan awooda ururada tan ugu yar iyo shuruudaha maamulka.

Waxaa fileyaa in qaar ka mid ah dadka deegaanka iyo bulshadu asal/jinsi, dhaqan ku dhisan inay xiisaha ka hor muujineyaan ka qeybgalid Kooxaha Mashruuca Dhaqaajiya kuwa kale. Mid City CAN waxay taageeraysaa wakhtiga ay dadka deegaanka ahi qabsadeen iyo u diyaargarowga ah inay isku mashquuleyaan waxyaabaha ay ka kooban yihiiin Kooxaha Mashruuca Dhaqaajiya ee nidaamka qorshaha. Waxay taageeraysaa qaar ka mid ah bulshada deegaanka ah ee xiisaha u muujiyey in sameeyaan "waddo" ka duwan, kaas oo qorshe ku salleysan deegaanka, kuwaas oo talooyinkooda soo jeedin doona. Talooyinkaas ay soo jeediyaan waa inay kula heshiiyaan talooyinka Kooxaha Mashruuca Dhaqaajiya inta uusan dhammaan nidaamka qorshaha. Golaha Bulshada waxaa loo qoondeeyey inay abuuraan wakhti siineyaan dadka deegaanka iyo saamileyaasha kale inay u dhex , taas oo u baahan qoddobada shir maalmeedka, marka la barbardhigo qaab-dhismeedka ay galaan iyo ka qeyb galka bandhigyada bulshada oo yar.

Kooxda Ilaha Kheyraadka: Kooxahan ilaha kheyraadka waxay u furan tahay dhamman ha'adaha iyo dadka daneynaya ee khibradaha kala duwan u leh hawlahooda. Waxaa koxahaas la isu raacin doona waajibaadyadan soo socda si loo horumariyo ka qeyb galka iyo qorsheynta mashruucan oo dhan.

- Kooxda Tababarka: waxay ka masuul yihiin in ay cayimaan tababarka ay u baahan yihiin dadka ka qeyb galaya mashuuracan (taas oo ay ku jirto tababarada gaaban ee bishiiba mar la qabto xilligan Guddiga Baahinta "Networking Council" oo lagu qabto luuqadda Ingiriiska iyo "Red Comunitaria" oo lagu qabto luuqadda Isbaanishka. In la dhiso qorsho dheer oo bulshada lagu horumarinayo iyadoo loo adeegsanayo in la tababaro hoggaamiyayaasheeda mustaqbalka.

Guddiga waxaa la rabaa in ay tababaraan dadkii wax tababari lahaa bilowga xilliga qorsheynta mashruucan.

- Kooxda Xalinta Khilaafyada: waxay kooxdani masuul ka tahay in ay dhageysato, isla mar ahaantaasna, ay xaliso khilaafyada ay dadka mashuurcan ka soo qeyb galaya ay soo bandhigaan xilliga qorsheynta mashruucan.
- Kooxda Wadahadalka iyo Xayeysiinta: waxay kooxdani mas'uul ka tahay iney sameeyaan wadahadal guud oo loo wada dhan yahay si ay u soo saaraan baaq ku wajahan mashruucan. Waxaa kale oo ay kooxdani ka mas'uul tahay in ay si simman warbixinta ugu kala gudbiso dadka iyo ha'adaha ka qeyb galaya mashruucan.
- Kooxda Qalabka Casriga ah: kooxdani waxay mas'uul ka tahay iney kordhiso isticmaalka qalabka casriga ah si ay u horumariso xidhiidhka warbixinnada; go'aamada kooxaha, iyo wargelinta bulshada.
- Kooxda Qiimeynta; kooxdani waxay ka mas'uul tahay iney ay sameyso habkii loo qiimeyn lahaa iyo natiijada ka soo baxaysa inta uu socdo qorsheynta mashruucani.
- Kooxda Luuqadaha: kooxdani waxay ka mas'uul tahay in ay sameyso sidii loo horumarin lahaa loona ururin lahaa kooxo turjumaano ah iyagoo isla markaas soo jeedinaya fursadaha tababarka ee bulshada si loo horumarito isfahanka dadka ku kala hadla luuqadaha kala duwan.
- Kooxdaa Ilaha Kheyraadka ee Dhallinyarada: waxaa ay kooxdani ka mas'uul tahay in ay hubiso in ay dhallinyadu ka qeyb geli karto xilligan qorsheynta iyo go'aan qaadashada iyagoo abuuraya fursadaha dhallinyartu ku xidhiidhi karto ayagoo ka gudbaya jinsiyadaha iyo dhaqammada kala duwan. Waxaa kale oo ay kooxdani laga rabaa in ay sameyso goobto wax ku ool ah oo ay dhallinyada iyo dadka waaweyn ay isku dhex geli karaan.
- Kooxda Sharciga: kooxdani waxaa ay ka mas'uul tahay iney kordhiso dariiqii ay bulshadu u mari lahay ilaha sharciga si loo horumariyo caafimaadka guud ee bulshada.

Marka la arko baahida iyo fursadaha kale ee soo baxa, Hay'ada Mid-City CAN waxay ku boorineysaa sameynta kooxo kale oo ilo kheyraadka kuwaas oo iyagu hawshooda qabsanaya.

Xukunka iyo iskudubaridka. Guddiga Iskudubaridka ee Mid-City CAN ayaa mas'uul ka ah kullanada iyo arrimaha lagaga falanqoonayo xilliga qorsheynta mashruucan. Waxaa kale oo ay ka mas'uul yihiin maamulka lacagta deeqda ah ee loogu tala galay dhisidda beel caafimaad qabta. Guddiga Maamulka waxaa loo doortaa iney xilka hayaan muddo labo sano ah. Guddiga badhkiis waxaa la doortaa sannad walba bisha Oktoobar marka ay Guddiga Baahinta Bulshadu ay kulmaan. Guddiga Dhaqaajinta Mashruuca iyo Guddiga Ilaha Kheyraadka waxay warbixin siinayaan dadka ka soo qeyb gala shirka bishiiba marka la qabto ee Guddiga Baahinta Mashruucan (hadda waxaa la qabtaa subaxa talaadada oo lagu soo jeediyaa luuqadda Ingiriiska) iyo (shirka luuqadda Isbaanishka oo la qabto Isniinta fiidkeeda). Shirarkan waxaa loogu tala galay in kooxaha kala duwan ee mashruucan ay warbixin isku weydaarsadaan xilligan qorsheynta mashruuca.

Qorshaha 9ka Bilood

Bisha 1aad illaa Bisha 3aad (Juunyo-Agoosto): U baahinta bulahsada iyo dhismaha guddiga dhaqaajinta mashruuca.

- **Ogeysiinta Guud ee Bulshada:** Si arrintan loo hir-geliyo waxaa loo baahan yahay in la gaadhsiiyo shan qeybood ee bulshada (Dadka deegaanka, ganacsatada, ha'ayada adeega-bixiya, ururada bulshada, iyo hay'adaha dawladda. Waxaana lama huraan ah in aad loo gaadhsiiyo jiniyadaha kala duwan, dhallinyarada, iyo dadka waaweyn ee da'da ah iyadoo loogu tagayo deegaamadooda ay deggan yihiin. Ujeeddada gaadhsiintani waa in lagu booriyo dadkaasi iney ka soo qeyb galaan mashruucan. Waxaana mudnaanta la saarayaa baahida koox kasta si ay fursad ugu helaan ka qeyb galka mashruucan.
- Afarta Kooxood ee Dhaqaajinta ee Mashruucan: si loo gaadho natiijada weyn ee laga rabo mashruucan, waxaa la sameyn kooxo dhaqaajiya, abaabula, oo hirgeliya mashruucan sida kor ku cad. Fursadahan waxaa la waafajinayaa gaadhsiinta bulshada si koox walba loo helo dad ka wakiil ah.
- Kooxda Dhaqaajinta Mashruuca "waa iney wada socdaan": kooxda dhaqaajinta mashruucan waxaa loo sameeyey in ay go'aan ka gaadho shuruucdii lagu maamuli lahaa, ujeedada mashruuca, xilliyada shirarka, iyo wixii la mid ah (iwm). Kooxahu waxay cayimayaan oo ay ururinayaa akhbaarta si ay waajibkooda u gutaan. Koox walba waxa diyaar u ah gar-gaar farsamo haddii ay u baahdaan si falanqeynta waajibaadkoodu uu macno u yeesho.

Bilaha 4aad ilaa iyo 6aad (Sebtember-Noofember): Qorshaha Tabta (Istiraatajiyada) /Sameynta Moodada Macquulka ah

- **Kooxaha Mashruuca Dhaqaajiya waxay sameeyeen Jiooyinka Istiraatejiyada:** Kooxaha Mashruuca Dhaqaajiya waxay si buuxda ugu mashquulsan yihiin inay sameeyaan qorsheyaasha istiraatejiyad guud si loo helo natiijooyinka ku waregsan afarta Natiijo ee Waaweyn. Dhammaan ka qeyb galeyaashu waxay sii wadi doonaan inay helaan taageerada farsamo ee ay u baahan yihiin si ay si macne leh doodaha iyo wada hadalka uga qeyb galaan.

Jihooyinka Istiraatejiyada ayaa gebi ahaanba la sameeyey: Afarta Kooxaha Mashruuca Dhaqaajiya ayaa isu yimuid si ay hawlihii ay qabteen kuwa kale ula wadaagaan, iyo inay abuuraan qorshe guud oo afarta kooxood shaqadooda isku xidheya. Qorshaha la sameeyey tallaabadan waa marxalada ugu dambeysay ee ay Golaha Bulshadu gaadheen, halkaasna waxaa bulshada guud loo soo bandhigeyaa fikirka qorshuhu waxa uu yahay. Ujeeddada talaabadanu waxaa weeyaan in dooda bulshada gebi ahaanba laga qeyb geliyo, in la helo jawaab-celiska jihada uu Kooxaha Mashruuca Dhaqaajiya u socdo iyo in nidaamkan dad dheeraad ah lagu martiqaado.

Bilaha 7aad ilaa iyo 9aad (Disember-Febraayo): Qorista iyo Qeybinta Qorshaha

- **Kooxaha Mashruuca Dhaqaajiya Shaqadoodii wey dhammeeyey:** Iyadoo la adeegsaneyo jawaab-celiska laga helay Golaha Bulshada, Kooxaha Mashruuca Dhaqaajiya kasta qorshahooda ayey ka shaqeynayaan iyaga oo sameynaya talaabooyinka waaaqiciga ah ee si au u dhammeystirraan natiijooyinka la xidhiidha.

Qorshe kama-dambeys ah ayaa la soo saareyin: Marka Kooxaha Mashruuca Dhaqaajiya ay qorshahooda dhammeeyaan, afarta Kooxaha Mashruuca Dhaqaajiya ayaa isu imaneya si ay isugu geeyaan qorshe kasta oo lagu daro qorshaha istiraatijiyada guud ee bulshada loo soo gudbineyo. Qorshaha la sameeyey talaabadan waa marxalada ugu dambeysa ee Golaha Bulshada, taas oo qorshaha kama-dambeysta loo soo gudbineyaa, kedibna ay bulshada guud oggolaatey. Oggolaanshaha rasmiga ah ee qorshaha waxaa ku xigeya xuska bulshada.

Qorshaha Shaqada Lixda Toddobaad ee Hore

- Toddobaad 1 (Juunyo 15)
    - Shir bulsheed oo lagu qabtay Dugsiga Sare ee Hoover si:

• Dib loogu kulmiyo kooxaha oo dhan, soo dhaweynta guddiga xulashadu inay is baraan dadka iyo guddiga kormeerku qorshuhu soo bandhigay ee qaab dhismeedka qorshaha.

• La sheego xawliga iyo kooxaha shadka, kulanka guryaha, iyo hawlaha tababarka tababareyaasha.

- Toddobaadka 2 (Juunyo 22)
    - Kulanka koowaad ee geedi-socodka iyo kooxaha saadka (sadka).
    - Kulan soo dhaweynta ha'ayadaha dooneya inay fududeeyaan kulanka guryaha si loo dhammeystiro qaab lacag soo saarka, ajendaha kulanka iyo hadafkooda.
- Toddobaadka 3 (Juunyo 29)
    - Kulanka ugu horeeya ee geedisocodka iyo Kooxaha Saadka.
- Toddobaadka 4 (Luuliyo 6)
    - Hawsha tababarka tababareyaasha cid kasta oo dooneysa inay ka qeyb gasho kooxaha la tababareyo
    - Kulanka guryaha ee koowaad
    - Red Comunitaria (Luuliyo 6)

Toddobaadka 5 (Luuliyo 13)

- Kulanka guriga ee Geedisocodka iyo Kooxaha Saadka ayaa

sii soconeya

- Kulanka guryaha ayaa sii soconeya
- Golaha Isgaadhsiinta (Luuliyo 14)

Toddobaadka 6 (Luuliyo 20)

- Kulanka Geed-socodka iyo Kooxaha Saadka ayaa sii soconeya
- Kulanka guryaha ayaa sii soconeya
- Kooxda tababarka ayaa qaabka tababarka u soo bandhigeya Golaha Iskudubaridka si loo ansaxiyo, wakhtina loogu qabto.